

# Daraasadda Waddada SR 900

## Soo Koobid Fulineed

**S**tate Route 900/Martin Luther King Jr. Way South ee Skyway-West Hill waa marin rakaab oo aad loogu socdaalo oo u dhaxaysa Renton iyo Seattle. Daraasadda marinka waxay diiradda saartaa qaybta

SR 900 inta u dhaxaysa 57th Avenue South iyo South 135th Street iyo dukumeenti la'aanta tas-hiilaadka gaadiidka firfircoo ee dhamaystiran iyo arrimaha hawlgalka iyo waxqabadka wadada.

### Bulshada Skyway-West Hill

Skyway-West Hill Community waa bulsho degaan oo kala duwan oo ku taal buurta dhinaceeda koonfureed ee harada Lake Washington Waxaa kale oo ka mid ah degmo ganacsi oo u dhow xarunteeda iyo sidoo kale laba xaafadood oo laga dukaameysto oo bari iyo galbeedba ah.

Degmada King waxay kormeertaa qorshaynta iyo wacyigelinta bulshada ee qaybtan aysan maamulin Degmada King ee u dhow magaalada Renton. Qayb ka mid ah mas'uuliyadaha qorsheynta Degmada King ee aagga Skyway-West Hill Community waxaa ka mid ah diyaarinta gorshaha goob hoosaadka.

WSDOT waxa dayactirtaa oo ay ku shaqaysaa SR 900 qaybtan aan la maamulin ee Skyway-West Hill.

### Waddada SR 900

SR 900/Martin Luther King Jr. Way South waxay u adeegtaa sidii isku xidhka tooska ah ee ka imanaya Interstate 5 ilaa Skyway Community iyo magaalada Renton. Waddada SR 900 waxay leedahay xawaare la dhejiyay oo ah 50 mayl-saacaddii laga bilaabo I-5 ilaa xadka magaalada Renton.

Waxaa jira isgoysyo calaamadeysan oo ku yaal qaybtan SR 900 ee South 129th Street iyo 68th Avenue South. Kani waa marin mashquul ah oo ay u adeegaan wadooyinka Metro Transit 101 iyo 102, kuwaas oo bixiya adeega rakaabka tooska ah inta u dhaxaysa Renton iyo bartamaha Seattle ee boosteejooyinka South 129th Street iyo 68th Avenue South.

Baaxaddan SR 900 ayaa ka maqan tas-hiilaad gaadiid oo firfircoo waxayna leedahay xulashooyin isgoys oo xaddidan. Waxaa arin si gaar ah xusid u mudan maadaama inta badan SR 900 ay xuduud la leeyihii xaafado la deggan yahay iyo dhismayaal dabaqyo ah, isticmaaleyaashanna waxay leeyihii ikhtiyaarro xaddidan oo ay ku socdaan, baaskiilka ku wadaan, ama ku degaan boosteejooyinka gaadiidka iyo suuqyada bulshada.

Meelaha ugu muhiimsan ee laga galoodaada la dega laga bilaabo SR 900 waa isgoysyada South 129th Street iyo South 133rd Street.

Isgoysyadan waxaa lagu muuijiyay dib u eegis waxqabad badbaado leh ee daraasaddan. Aqoonsiga iyo diiwaan gelinta walaacyadan ayaa ah xoogga ka dambeeya daraasadda marinka.



*Boosteejada marinka ee SR 900 ee dhanka galbeed ee galbeedka 68th Avenue South.*

## Wacyigelinta

### Bulshada/Daneeyayaasha Daraasada

WSDOT waxay martigelisay guri furan oo onlaayn ah iyada oo la adeegsanayo websaydka Engage WSDOT, kaas oo bixiyay khariidado marineed, dulmar xaaladaha jira, xogta shilalka la isku daray ee 2015 illaa 2019, iyo sahamin onlaayn ah. Kooxda daraasaddu waxay xayaysiisay guriga furan ee onlaynka ah iyo sahanka iyagoo isticmaalaya hababka soo socda:

- Baraha bulshada iyo liisaska iimaylka ee la sameeyay
- Liis iimayl oo u gaar ah daraasadda
- Websaaydka WSDOT
- Warqado boosto oo loo diray in ka badan 3,000 oo guri oo ku yaala aagga daraasadda
- Dawlada hoose iyo shuraakada qabaa'ilka, iyo ururada bulshada ku salaysan ee ku xira dadka dakhligoodu hooseeyo iyo dadka aqoontooda Ingiriisiga yar tahay

Guriga furan iyo xog-ururinta – oo lagu bixiyo Ingiriis, Isbaanish, Soomaali iyo Fiyatnaamiis – ayaa gaaray dadweyne kala duwan iyadoo ay ka qaybgaleen dad da' kasta leh oo ka soo kala jeeda asalo ku kala duwan, dhaqan, iyo dhaqaale. Guriga furan ee onlaynka ah ayaa la daawaday 3,188 jeer, sahankana waxaa dhamaystiray 196 jawaab bixiye oo wadaagay macluumaadka ku saabsan sida iyo sababta ay u isticmaalaan marinka.

Afar mawduuc oo muhiim ah ayaa ka soo baxay wacyigelinta: la'aanta tas-hiilaadka dadka lugeynaya, xawaaraha darawalka oo xad dhaaf ah, ciriiriga SR 900, iyo iftiin la'aanta hareeraha waddada.

Waxaa la dhisay guddi daneeyayaal ah oo qayb ka ah daraasaddan oo laba jeer kulmay. Iskaashatooyinka daneeyayaasha waxaa ka mid ahaa: King County Local Services

King County Metro, magaalada Renton, Renton School District, Washington State Patrol, West Hills Community Association iyo Puget Sound Regional Council (PSRC). Guiddiga daneeyayaasha ee SR 900 ayaa dib u eegay oo ay taageereen falanqaynta farsamada, wacyigelinta dadweynaha, iyo talooinka daraasadda ee labadoodii shir.

### Istaraatijiyyadaha Hagaajinta

Istaraatijiyyadaha Hagaajinta ee SR 900 ayaa la sameeyay si loo helo tas-hiilaad siman oo dadka loogu xidho shaqooyinka, guryaha, xaafadaha iyo suuqyada bulshada ee ku teedsan jidka. Iyada oo ku saleysan talada bulshada iyo iskaashatada, xeeladaha hagaajintu waxay diiradda saareen wax ka qabashada welwelka xawaaraha, iftiinka, tas-hiilaadka gaadiidka firfircooni, iyo isgoysyada calaamadeysan - bixinta jawi dejin oo soo dhaweyn leh oo ay heli karaan dhammaan isticmaalayaasha.

Diirada daraasadda dhow/dhexe waxay diiradda saareysaa hagaajinta badbaadada iyo helitaan cadaalad ah halkii wax looga qaban lahaa ciriiriga. Waxaa jira fursado xaddidan oo wax looga qabanayo ciriiriga ka jira waddada, iyo xeelado kasta oo mustaqbalka ah waxay u baahan doonaan daraasad dheeraad ah oo ku saabsan shabakadda ballaaran oo ay ku jiraan I-5 iyo I-405.

Xeeladaha horumarinta dhow/dhexe ee lagu taliyay waxaa ka mid ah:

#### A) Waddooyin Marshabiyeedi oo Dhamaystiran oo ku yaal SR 900

Istaraatijiyyadda ugu horraysa ee la soo jeediyay ee horumarinta ee SR 900 ee bulshada Skyway-West Hill waa horumarinta tas-hiilaadka gaadiidka firfircooni ee u dhexeeyaa South 129th Street iyo 135th Avenue South, ee dhamaadka daraasadda





Fikradda wareega ee SR 900 ee South 129th Street taasoo muujinaysa wadada ka timaada suuqyada bulshada ilaa xaafadaha laga galo South 129th Street

xuduudaheeda. Fikradan waxaa ku jira 10-fiit oo laami ah oo ku yaal labada dhinac ee SR 900 ee aaggan

oo loogu talagalay dadka lugeynaya iyo gaadiidka firfircoo, oo ay weheliyaan iftiin iyo muuqaalo dusha sare ah. Wadarta qiyaasta kharashka heerka qorshaynta ee xirmadan laamiga waa \$20.2 milyan.

WSDOT waxay sidoo kale soo jeedinaysaa in lagu rakibo nalka taraafikada South 133rd Street si loo yareeyo shilalka, iyo isgoys calaamadaysan oo ku yaala agagaarka South 135th Street si dadka degan aagga loogu xiro boosteejada baska ee bari ee ka soo horjeeda Creston Point Apartments.

## B) Wareega oo ku yaal isgoyska SR 900 iyo South 129th Street

Wareegga ku yaal South 129th Street wuxuu u adeegi karaa sidii albaab laga soo galo bulshada Skyway-West Hill iyo caawinta dhimista xawaaraha iyo heerarka cariiriga taraafikada ee isticmaalayaasha gaadiidka firfircoo. Qiyaasta kharashka heerka qorshaynta ee fikradda wareega waa \$3.8 milyan.

Wareega ku yaal isgoyskan ayaa si buuxda u siinaya suuqa bulshada laga bilaabo SR 900

yo South 129th Street. Waxaa kale oo ay yaraynaysaa shilalka ka iman kara isgoyskan. Taxane Tabbeelooyin Nalal ah oo Afargees ah (Rectangular Rapid Flashing Beacons, RRFBs) ayaa lagu dari doonaa si kor loogu qaado kala gudubka isgoyska.

## C) Xeelado Muddada Dhow / Qiime jaban

Waxaa jira dhowr xeeladoo do hagaajineed oo muddada dhow oo loo soo jeediyay SR 900, kuwaas oo qaarkood hore loo fuliyay:

- Yaraynta xadka xawaaraha oo laga dhigayo 45 MPH. Tan waxaa loo hirgelin doonaa si ku meel gaar ah si wax looga qabto xawaaraha jidka oo ay weheliso daraasadda xawaaraha ee ku xigt ee WSDOT iyada oo la kaashanaysa magaalada Renton iyo Degmada King.
- Hagaajinta calaamadaya iyo kala qaybinta dhowr isgoysyo yaryar si loo yareeyo suurtgalnimada shilalka darawaliinta iyo isticmaalayaasha gaadiidka firfircoo.



Isgoyska SR 900 iyo South 129th Street ee u jeeda galbeed.

### Hawlah La Dhamaystiray :

- Rakibaadda meesha dadka lugeynaya maraan (Leading Pedestrian Interval, LPI) wakhtiyeynta nalka, kala qaybinta meesha dadka maraan iyo calaamadaynta isgoyska SR 900 iyo South 129th Street. Sidoo kale, tabeelaha nalka ee dheeraadka ah ayaa lagu rakibay taraafikada dhanka midigta u leexanaysa ee ka imanaysa galbeedka South 129th Street una sii jeeda woqooyiga SR 900.

### Tallaabooyinka Xiga

Daraasadda Waddada SR 900 ee agagaarka Skyway-West Hill waxay ku dhammaatay diyaarinta warbixinta daraasadda ugu dambeysa oo leh natijjooyin iyo talooyin muhiim ah. Talooyinka daraasadda sidoo kale waxaa lagu daabici doonaa [websaaydka daraasadda](#) si dadweynaha u arkaan loona tixgeliyo.

Xeeladaha hagaajinta ee lagu taliyay Daraasadda Qorshaynta Waddada SR 900 waxay u sahlaysa WSDOT iyo iskaashatooyinka maxalliga ah inay wax ka qabtaan arrimaha waxqabadka ee la aqoonsaday iyo daldaloolada ka jira marinka SR 900. Laakiin waxay u baahan doonaan in lagu daro qorshayaasha dowlada, gobolka, iyo deegaanka si loo meel dhigo hagaajinta la soo jeediyay ee maalgelinta mustaqbalka. iyo dhaqangelinta. Hadda, ma jiro wax maalgelin ah

oo loo aqoonsaday xirmooyinka istiraatijiyyadeed ee lagu taliyey daraasaddan, sidaas darteed waxay ku qasbanaan doontaa WSDOT iyo iskaashatooyinka maxalliga ah inay go'aamiyaan ikhtiyaarrada maalgelinta si horay loogu socdo.

Baahida mustaqbalka dhow waa in la raadiyo maalgelinta si loo bilaabo naqshadaynta xeeladaha daraasadda muhiimka ah sida hagaajinta wareega ee isgoyska South 129th Street iyo sidoo kale 10-fii oo marshabiyeedi ah ee labada dhinac ee SR 900. Codsiyada deeq-lacageedka ee dowladda ee soo socda ee PSRC (FHWA/FTA) waxay bilaabmi doontaa guga 2022 waxayna noqon doontaa fursad lagu raadiyo maalgelinta naqshadaynta xeeladaha SR 900. Maalgelinta deeqda lama hubo maadaama nidaamku yahay mid tartan ah oo ay jiraan baahiyo badan oo aan la maalgalin oo ka jira guud ahaan gobolka Puget Sound.


Deeq-lacageedka dheeriga ah ee horumarinta mashruuca iyo dhismaha waxay u badan tahay inay noqoto geeddi-socod dhownr sano ah.



Bariga SR 900 ee bariga South 129th Street.

## Fikrada Wareega

SR 900 EE SOUTH 129TH STREET




## Fikrada Waddada

SR 900 LAGA BILAABO 57TH AVENUE SOUTH ILLAA SOUTH 129TH STREET




SR 900 LAGA BILAABO SOUTH 129TH STREET ILLAA SOUTH 133RD STREET



## Fikrada Waddada

SR 900 LAGA BILAABO SOUTH 133RD STREET ILLAA 68TH AVENUE SOUTH



SR 900 LAGA BILAABO 68TH AVENUE SOUTH ILLAA SOUTH 135TH STREET

